# AWOODDA AY KALKAALIYAHA CAAFIMAAD KU LEEDAHAY INAY QOF LAGA DAAWEYNAAYO JIRRO MASKAXEED KU XIRTO ISBITAALKA

(Qeybta 5(4) ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca qofta mas'uul ka ah xannaanadaada | |
| 3. Magaca kalkaaliyaha caafimaad halkaan kugu hayso | |

## Waa maxay sababta aan isbitaalkaan uga tagi karin?

Waxaa isbitaalka lagugu haayaa sida u qabo qaybta 5(4) ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983. Kani waa awood sharciyeed ee kalkaaliye caafimaad siinaayo awood ay isbitaalka kugu hayso ilaa u ku arko qofka mas'uul ka ah daaweyntaada, ama ku-xigeenkooda. Kalkaaliyaha waxay aaminsan tahay inaad qabtid jirro maskaxeed iyo aadan qabin caafimaad kugu filan oo aad ku baxdo.

"Ku-xigeenka" waxaa loola jeedaa qof go'aan gaari karo markii qofka mas'uul ka ah daaweyntaada meel kale ku maqan yahay.

## Ilaa goormee ayaa halkaan laygu hayn doonaa?

Waa inaad isbitaalkaan joogtaa ilaa lix saacadood ama ilaa qofka mas'uul ka ah daaweyntaada ama ku-xigeenkooda u sheego inaad bixi karto. Haddii aad isku daydo inaad baxdo shaqaalaha ayaa ku joojin doono, markii aad baxdana, waa lagu soo qaban karaa iyo lagu soo celin karaa.

Xaaladdaada, lixda saacadood waxay dhammaanayaan:

| Taariikhda | Saacadda |
|---|---|
| | |

Haddii qofka mas'uul ka ah daaweyntaada ama ku-xigeenkooda uusan kugu arkin waqtigaan gudeheeda, waxaad ku fasaxan tahay inaad baxdo. Laakin haddii aad markaas ku go'aansato inaad baxdo, fadlan marka horey la hadal kalkaaliye ama xubino kale ee ka mid ah shaqaalaha.

## Maxaa dhacaayo intii halkaan laygu haayo?

Shaqaalaha isbitaalka waxay kuu sheegi doonaan daaweyn walba ay u maleeyaan inaad u baahan tahay. Waxaad xaq u leedahay inaad diido daaweyn walba ee aadan doonaynin. Xaalado gaar ah o kaliya, kaasoo laguu macanyn doono, ayaa lagu siin karaa daaweyn aadan rabin.

## Maxaa dhacaaya oo xigo?

Qofka mas'uul ka ah daaweyntaada, ama ku-xigeenkooda, ayaa go'aan ka gaari doono inaad u baahan tahay inaad isbitaalka joogto waqti ka dheer. Waxaad go'aansan kartaa inaad si ikhtiyaar ah ku jogto.

Haddii aad weli rabin inaad joogto isbitaalka, iyo qofka mas'uul ka ah xannaanadaada ama ku-xigeenkooda, u maleeyo inaad aad u jiran tahay iyo bixin karin, waxay halkaan kugu haayn karaan qayb kale ee ka mid ah Xeerka Caafimaadka Maskaxda. Waxay kuu sheegi doonaan sababta iyo dhirirka aad ku jiri doontid, kaaso la isticmaali doono qayb kale ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda. Waxay ku sheegi doonaan sababta halkaan lagugu hayn doono, waxaana lagu siin doonaa buug-yare kale oo ku macneynaayo wixii xiga ee dhici doonaa.

Haddii qofka mas'uul ka ah daaweyntaada, ama ku xigeenkooda, ay go'aansadaan inaadan u bahnayn inaad joogto, ayaga ama xubin kale ee shaqaalaha ka mid ah ayaa kaagala hadli doono caawinaad kale ee lagaa rabo inaad hesho.

## Miyaan rafcaan soo codsan karaa?

Maya. Xittaa haddii aadan waafiqin inaad u baahan tahay inaad joogto isbitaalka iminka, rafcaan ma ka samayn kartid go'aanka in lagugu haayo halkaan sida u qabo qaybta 5(4).

## Ogeysiinta qooyskaaga soke

Nuqulka buug-yarahaan waxaa la siin doonaa qofka uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda u ku aqoonsado inuu yahay qooyskaaga soke.

Waxaa jiro liis ku qoran dad ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda ula dhaqmo inay yihiin qoyskaaga. Caadi ahaan, qofka ugu sareeya liiskaas ayaa lagu magacaabi doonaa inuu noqdo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka wuxuu ku siin karaa buug-yare si fiican kani kuu sharraxaayo iyo ku qoran xuquuqyada uu qoyskaaga soke ku leeyahay daaweyntaada iyo xannaanadaada.

Xaaladdaada markii la fiiriyo, waxaa noola sheegay in qoyskaaga soke uu yahay:

| |
|---|
| |

Haddii aadan rabin inaad hesho nuqulka buug-yarahaan, fadlan u sheeg kalkaaliyahaaga ama xubin ka mid ah shaqaalaha.

## Beddelida magaca qoyska soke

Haddii aadan u malayn in qofkaan u ku habboon yahay inuu ahaado qoyskaaga soke, waxaad codsi ka samayn kartaa Maxkamadda Degmada in qof kale lagu magaacabo qoyskaaga soke. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kani kuu sharraxaayo.

## Warqadahaada

Dhammaan warqadaha laguu soo diro intii aad isbitaalka ku jirto waa lagu siin doonaa. Qof walba ayaad warqad u diri kartaa aysan ka ahayn qof diidey inaad warqad u soo dirto. Warqadaha loo diro dadkaan waxaa joojin karo shaqalaha isbitaalka.

## Sida cabasho loo sameeyo?

Haddii aad rabto inaad ka cabato wax walba ee xiriir la leh xannaanadaada iyo daaweyntaada isbitaalka, fadlan la hadal xubin ka mid ah shaqaalaha. Waxay awoodi karaan inay xaaladda xalliyaan. Waxay xittaa ku siin karaan macluumaadka habsocodka cabashada ee isbitaalka, oo aad isticmaali karto sidii aad u xalliso cabashadaada adigoo u maraayo wax lagu magacaabo xal-helidda deegaanka. Waxay xittaa kuu sheegi karaan qof walba ee kale ee kugu caawin karo samaynta cabashada.

Haddii aadan u malayn in hab-socodka cabashada ee isbitaalka ku caawin karo, waxaad ka caban kartaa Guddii madaxbanaan. Guddiga wuxuu kormeera sida loo isticmaalo Xeerka Caafimaadka Maskaxda, sidii uu u hubiyo in si sax ah loo isticmaalo, iyo in shaqaalaha si sax ah u xannaaneeyaan bukaanlayda intii ay isbitaalka joogaan. Shaqaalaha isbitaalka waxay ku siin karaan buug-yare kuu macneynaayo sidii loola xiriiro Guddiga.

## Shuruud Dabakhaad

Waxaa jiro Shuruud Dabakhaad oo shaqaalaha isbitaalka ku talinaayo Xeerka Caafimaadka Maskaxda iyo sida loola dhaqmo dadka qabo dhiibato maskaxeed. Waa in shaqaalaha tixgeliyaan waxa uu Shuruudda sheegaayo markii ay go’aan ka gaarayaan xannaanadaada. Waxaad weydiin kartaa inaad aragto nuqulka Shuruudda, haddii aad doonayso.

## Sidii aad u hesho caawinaad iyo macluumaad dheeraad ah

Haddii uu jiro wax aadan ka garan xannaanadaada iyo daaweyntaada, xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa isku dayi doono inuu ku caawiyo. Fadlan ka codso xubin ka mid ah shaqaalaha inuu kuu sharraxo haddii uu jiro wax aadan ka garanin buug-yarahaan ama haddii aad qabtid su’aalo oo buug-yarahaan ka jawaabin.

Fadlan weydii haddii aad qof kale u rabto nuqul kale ee buugyarahaan.